

# U diyaargarowga is-diiwaangelinta iyo codeynta.



**ELECTORAL  
COMMISSION**  
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI

## Waxaad iskaga diiwaangelineysaa inaad codeysid?

Haddii aad ka diiwaangashantahay codeynta, waa inaad hadal ka dhahdaa doorashooyinka guud, doorashooyinka deegaanka iyo aftiyada. Doorashooyinka waa fursadaada aad ku dhahdid hadal ku saabsan kaas oo kugu matalo arimaha aad jeceshahay.

**Waxaad ku hubin kartaa in codkaaga la maqlo adiga oo iska diiwaangelinayo inaad codeysid.**



## Yaa iska diiwaangelin karo inuu codeeyo?

Waa *inaad* is diiwaangelisaa haddii aad:

- tahay 18 sanno jir ama ka weyntahay, iyo
- tahay muwaadin New Zealand ah ama dadka tooska u dagan New Zealand, iyo
- aad ku nooleyd New Zealand in ka badan hal sanno oo si joogta ah qeyb ka mid ah nololshada.

Haddii aad tahay Ustareeliyaan, Māoriga Cook Island, Niuean ama Tokelauan, waxaa kaliya oo aad iska diiwaangelin kartaa markii aad si joogta ah u daganaato 12 bilood New Zealand.

Haddii aad ku nooshahay wadan dibada ah waxaad isku diiwaangelin kartaa inaad codeysid haddii aad:

- tahay muwaadin reer New Zealand ah joogayna gudaha New Zealand sadexdii sannooyin ee ugu danbeysay; ama
- tahay qof si joogta ah u deggan New Zealand oo horay u joogay gudaha New Zealand 12-kii bilood ee ugu danbeeyay.

Waad is diiwaangelin kartaa markii aad gaartid 17. Markii aad gaartid 18, si toos ah ayaa lagu diiwaangelinayaa oo waxaad diyaar u ahaaneysaa inaad codeysid.



## Goorma ayaan iska diiwaangeliaa inaan codeeyo?

Way sahlantahay in la iska diiwaangeliyo ama la cusbooneysiyo sharaxaadahaaga. Waad:

- Booqan kartaa **vote.nz** oo aad isticmaali kartaa shatiga darawalnimada New Zealand, baasaboorka New Zealand ama aqoonsiga RealMe ee la xaqiijiyay si looga diiwaangeliyo onleenka
- Si bilaash ku soo wac **0800 36 76 56** oo weydii foomka adiga lagu soo dirayo

Markii aad is diiwaangelisid, magacaaga wuxuu aadayaa codeynta doorashada. Waa inaad ku jirtaa liiska dadka codeynaya doorashada si aad u codeysid.

Waxaad u baahantahay inaad cusbooneysid sharaxaadahaaga waqti walboo aad guri ka guurtid.



## Iska diiwaangelinta codeynta haddii aad tahay Māori

Haddii aad ka soo jeedid Māori oo aad ka diiwaangelineysid waqtigaga ugu horeeyay, waxaad leedahay dooq muhiim ah oo la sameeyo. Waxaad u baahantahay inaad go'aansatid liiska dooraashada aad rabtid inaad ku jirtid: liiska guud ama doorka Māori.

Dooqaaga waxay saameysaa doorashada aad ku codeysid doorashada guud.

Haddii aad dooratid liiska doorashada guud, waxaad u codeyneysaa musharaxa doorashada guud. Haddii aad dooratid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxa doorashada Māori. Waxaad u codeyneysaa isla liiska oo xisbiyada siyaasadeed oo liis walboo aad ku jirtid.

Liiska aad dooratid waxay saameyn kartaa qaabka aad ugu codeysid doorashooyinka deegaanka. Haddii aad ku jirtid liiska Māori oo maamulka deegaankaaga leeyihiin qeybta Māori ama degmada, waxaad u codeyneysaa musharaxa ku jiro qeybta Māori.

Haddii aad badeshid maskaxdaada markii aad dooratid kadib liiska (Māori ama guud ahaan), waxaad badeli kartaa liisaska inta lagu jiro Dooqa Doorashada Māori, taas oo dhacdo qiyaastii 5 sanno ee walba.



## Ma u baahantahay caawinta la iskaga diiwaangeliyo?

Waxaad weydiin kartaa qof aad garanaysid, sida saaxib ama xubin qoyska ah, ama waxaad weydiin kartaa diiwaaniyahaaga deegaanka ee doortayaasha, si ay kaaga caawiso dhameystirka foomka diiwaangelintaada, ama kuu dhameystiro foomkaaga adiga.

Waxaad u baahantahay inaad saxiixdo foomka.

Haddii aad garanaysid qof aanan dhameystiir karin oo aan saxiixi karin foomka diiwaangelintooda sababtoo ah curyaanimada jirka ama maskaxda, waxaa kuu suurtagaleyso inaad caawisid.

Booqo **vote.nz** si aad wax badan uga ogaatid ku caawinta qofka iska diiwaangelinta codeynta.



## Ma ka walaacsantahay badbaadada shaqsigaaga?

Haddii aad ka walaacsantahay badbaadada shaqsigaaga, ama mida qoyskaaga, waxaad codsan kartaa inaad aadid liiska qarsoodiga aan la daabicin. Waxaan ku hayneynaa sharaxaadaha diiwaangelintaada si badbaado ah oo qofna ma siineyno.

La hadal diiwaaniyahaaga diiwaagaanka ee doortayaasha, booqo **vote.nz** ama soo wac **0800 36 76 56** wixii warbixin dheeraad ah iyo foomka codsiga.



## Ma u baahantahay warbixin badan?

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan is diiwaangelinta iyo codeynta:

- Booqo **vote.nz**
- Booqo **facebook.com/VoteNZ**

Warbixinta ku saabsan is diiwaangelinta iyo codeynta waxaa lagu heli karaa 27 luuqadood oo **vote.nz**



**ELECTORAL COMMISSION**  
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI